

Daadihiye
Citizen
Engagement

WARGELINTA BILLAHA

JANAAYO 2023



HORDHACA BARNAAMIJKA

Ku soo dhawow caddadka 2-aad ee wargeliyaha Daadihiye. Waxay ahayd bil kale oo wax soo saar iyo dhiirrigelin leh in aan la falgalno bulshada si aan u sii fahanno kaalinta ay ka qaadan karto dhismaha nidaam dawladeed oo saldhiggiisu yahay isla-xisaabtan.

Caddadkan waxa uu muujinayaa waxyaabaha ugu muhiimsan ee ka soo baxay wadashaqaynta dadka deggan Muqdisho iyo dawladda hoose. Natijoooyinka aan helnay waxaa ku jira casharro muhiim u ah siyaasad-dejiyeyaasha iyo hawl-wadeennada kale oo la xiriira dhismaha bulsho xooggan oo loo dhan yahay oo ku tallaabsata horumar waara.

Daadihiye waa barnaamij tala-gelin bulsho oo ay taabba-gelisay Raagsan oo ah shirkad maxalli ah oo xoojisa codadka muwaaddiniinta, fursadna u siisa in ay qeyb ka noqdaan miiska go'aan gaarista si loo xaqiijiyo in barnaamijyada iyo siyaasaduhu ay salka ku hayaan xaqiiqooyinka maalinlaha ah ee bulshada Soomaaliyeed.

Haddii aad danaynaysid in aad wax badan ka ogaatid Daadihiye, ama aad jeceshahay in aad nala wadaagto aragtidaada ku aaddan hawlaheenna, waxa aad nagala soo xiriiri kartaa daadihiye@raagsan.com. Boggeenna internetka www.daadihiye.com waxa aad ka heli kartaa xog dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka. Waxa aan rajaynaynaa in aad ka bogan doontid akhrinta wargelintan, aadna booqan doontid boggeenna internetka si aad wax badan uga ogaatid wayxaabaha uu qabto barnaamijka Daadihiye.

Ifafaale wacan,

Badra Yusuf

Maamulaha Shirkadda Raagsan



SIDEE AYAAN ULA XIRIIRNAA BULSHADA?



Sahan Cilmibaaris



Madal Dadweyne



Barnaamij Idaacad



Wadahadal Lala Yeelanayo
Siyaasad-dejiyeyaasha



Wicitaanka Dadweynaha



Mareegta Isla-falgalka
Online-ka

NATIJOOYINKII KA SOO BAXAY SAHANKA

NATIJOOYINKII UGU MUHIIMSANAA OO KOOBAN

Wargelintan waxaan ku baaraynaa siyaabaha ay dadyowga Muqdisho ula falgalaan dawladda hoose sida bixinta canshuuraha iyo ka-qeybqaadashada geeddi-socodka dawladdimo. Waxaa kale oo aan diiwaangelinay rajada dadka deegaanka ee la xiriirta helida adeegyada iyo sida ay dawladdu uga shaqayn karto horumarinta helitaanka iyo tayada adeegyada. Halkan waxaan si kooban ugu soo bandhigaynaa natiijoyinkeena.

HESHIIS BULSHO

- 57% (616) ee dadka la waraystay ayaa bixiya canshuuraha
- 86% (924) ee dadka kama war hayaan sida dawladdu u adeegsato canshuuraha
- Waxbarashada, kordhinta wax-soo-saarka cuntada iyo maaraynta qashinka ayaa ah meelaha ugu muhiimsan oo dadku ka filayo in dawladdu wax ka qabato

HORUMARINTA HELIDDA ADEEGYADA

- Bixinta adeegyo tayo leh
- Xoojinta nidaam loo dhan yahay, isla-xisaabtan ku dhisan, oo daahfuran
- Diyaarinta madal fududaysa is-dhex-galka bulshada iyo dawladda
- Xoojinta sinnaanta iyo caddaaladda
- Bixinta adeegyo u qalma kharashaadka laga bixiyo

LA FALGALKA DAWLADDA HOOSE

- 66% (714) dadkii la waraystay waxa ay soo gudbiyeen in aysan ogayn in dawladda hoose ay qabato shirar ay is-dhex-gal kula yeelato bulshada

MATALAADDA DAWLADDA HOOSE

- 79% (849) dadkii la waraystay waxa ay soo gudbiyeen in aysan ogayn in uu jiro gole degaan oo ay leedahay degmadooda

WAXA DADKU KA FILAYAAN DAWLADDA

- Horumarinta Amniga
- Helidda Waxbarasho
- Daryeel Caafimaad
- Abuuridda Fursado Shaqo

DADKA AAN IS MAQALNAY




**17
DEGMO**




**1,079
JAWAAB-BIXIYE**

Waxa aan waraysannay 1,079 qof oo deggan 17-ka degmo ee magaalada Muqdisho. Waxa ay nooga warrameen is-dhexgalkooda ku aaddan dawladda hoose iyo sida ay canshuurbixiyeyaashu u qaabayn karaan arrimaha hortebinta u leh dawladda hoose.




Shax 1-aad: Dadka aan la xiriirnay ee degmooyinka kala duwan

XOGTA DADKA



Xog ururintii aan samaynay bisha Janaayo waxaa ka qeybgalay 508 oo rag ah iyo 571 oo haween ah.





Shaxda 2-aad: Qeybaha dadka la waraystay

Badanka jawaab-bixiyaasha waxa ay ahaayeen dadka degaanka. Waxaa xusid mudan in ku dhawaad kala bar jawaab-bixiyaasha ay ahaayeen dad cusub (muhaajir dhaqaale, barakacayaal, iyo kuwa qax ka soo noqday). Sidoo kale, kala bar tirada guud ee jawaab-bixiyaasha ayaa magaalada ku noolaa 1 ilaa 5 sano.



Shaxda 3-aad: Sanadaha ay Jawaab-bixiyeyaashu ku noolaayeen Muqdisho

Kala bar jawaab-bixiyeyaashu ma ahayn kuwa shaqeeya, iyadoo 43% aysan helin waxbarasho rasmi ah.



Shaxda 4-aad: Waxbarasho iyo Heerka Shaqada

MAXAA NOO SOO BAXAY? LA DHAQANKA DAWLADDA HOOSE

Talagelinta bulshadu waxa ay ku salaysan tahay aragtida ah in muwaadiniintu cod yeeshaan taasna ay fududayso xaqiijinta in barnaamijyada iyo adeegyadu ay noqdaan kuwo ku habboon baahiyahooda, ayna dareemaan lahaanshaha adeegyadaasi, iyo ka qaybqaadashada isla xisaabtanka la xiriira bixinta adeegga.

Talagelinta bulshadu waxa ay diiradda saartaa awoodsiinta shakhsiyadka si ay mas'uul ugu noqdaan noloshooda, kana qeyb qaataan xal u helidda caqabadahooda, iyo in ay fal-celin ka bixiyaan tayada adeegyada ay helaan. In dadka ay cod yeeshaan waxa ay awood u siinaysaa in ay ka qayb qaataan geeddi-socodka horumarka. Dhanka kale, si loo xalliyo caqabadaha bulsho, dhaqaale, iyo degaan ee adduunka, waxaa lama huraan ah in la tixgeliyo aqoonta, waayo-aragnimada, aragtida, iyo qiyamka muwaadiniinta ay sida tooska ah u saameeyeen caqabadahaasi.

Aasaaska talagelinta bulshada waa hubinta in siyaasadaha iyo barnaamijyada ay siyaasad-dejiyayaashu keenaan ay yihiin kuwo ka jawaabaya baahiyaha dadka. Sahanka cilmi-baarista ee barnaamijka Daadihiye ayaa diiradda lagu saaray sidii loo ogaan lahaa sida dadka Muqdisho ku nool ula macaamilaan dawladda hoose iyada oo laga eegayo saddex dhinac:

- Canshuuraha ay bixiyaan muwaadiniinta iyo isticmaalkooda
- La dhaqanka dawladda
- Matalaadda dawladda hoose

LA FALGALKA DAWLADDA - BIXINTA CANSHUURAHA

57% (616) jawaab-bixiyeyaasha ayaa sheegay in ay bixiyaan canshuurta.

- In kasta oo dadka badankiisu ay bixiyaan canshuuraha, 86% (924) waxa ay sheegeen in aysan ogeyn sida loo isticmaalo canshuuraha ay bixiyaan dadka deggan Muqdisho.
- 52% (564) jawaab-bixiyeyaasha ayaa sheegay in ay u baahan yihiin in laga talageliyo sida dawladda hoose ay u adeegsanayo canshuuraha.

Waxaa kale oo la waydiiyey dadkii la waraystay waxyaabaha mudnaanta u leh iyo halka ay tahay in dawladdu ku maalgelinayso cashuuraha laga qaado dadka. Waxbarashada, kordhinta wax-soo-saarka cuntada, iyo maareynta qashinka ayaa noqday meelaha ugu mudnaanta leh ee ay muwaadiniintu is leeyihiin in dawladdu ay ku kharash garayso canshuuraha marka ay u adeegayaan dadka Muqdisho.


Adeegyada bulsho: Waxbarashada (70.8%), caafimaadka (63.9%), iyo helidda korontada (49.3%) ayaa la soo gudbiyay in yihiin adeegyada bulshada ee ugu mudnaanta badan oo ay tahay in dawladdu ay ku bixiso canshuuraha.

Adeegyada dhaqaale: kordhinta wax-soo-saarka cuntada (56.4%), helidda maalgelin (53.9%), iyo abuuridda fursado shaqo (51.4%) ayaa ahaa adeegyada dhaqaale ee dadku soo tebiyeen in ay dawladdu canshuuraha ku kharash garayso.


Adeegyada degaanka: Adeegyada ururinta qashinka (53.8%), dhismaha bullaacadaha (47.1%), iyo adeegyada tayodhowrka biyaha (37.8%) ayaa ahaa saddexda adeeg ee degaanka ee ay dadku doonayaan in ay dawladdu maalgelin ku samayso.

HALKEE AYAY TAHAY IN DAWLADDU AY KU BIXISO CANSHUURAHA?


Adeegyada Bulsho	<ul style="list-style-type: none"> Waxbarasho Daryeel Caafimaad Koronto
Adeegyada Dhaqaale	<ul style="list-style-type: none"> Kordhinta helidda cuntada Helidda adeegyada maaliyadda Abuuridda fursado shaqo
Adeegyada Degaanka	<ul style="list-style-type: none"> Adeegyada ururinta qashinka Dhismaha bullaacadaha Adeegyada tayodhowrka biyaha



Shaxda 5-aad: Meelaha ay tahay in dawladdu ku bixiso canshuuraha



Shaxda 6-aad: Meelaha ay dawladdu ku bixin karo canshuuraha: Economic Services



Shaxda 7-aad: Meelaha ay dawladdu ku bixin karto canshuuraha: Adeegyada Degaanka

LA FALGALKA DAWLADDA - KULAMADA DEGMOOYINKA

Shirarka ay soo qabanqaabiso dowladda hoose ayaa noqon kara hab aad u wanaagsan oo ay muwaaddiniinta mid mid ugula falgalaan isla markaana lagu fahmo caqabadaha kala duwan ee ay la kulmaan dadka deggan Muqdisho.

- **66% (714)** jawaab-bixiyaasha ayaa soo gudbiyay in aysan ogayn in dawladda hoose ay qabanqaabiso kulamo dadweyne.
- Keliya **13% (139)** ayaa sheegay in dawladda hoose ay si uun shirar ula yeelato dadweynaha. Tiro aad u yar oo ka mid ah ayaa sheegay in ay ka qeybgaleen kulamo ay qabatay dawladda hoose halka badankood ay sheegeen in aysan shir ka qeyb gelin.

Waxaa kale oo aan baarnay sababta ay dadku xiriir kooban ula leeyihiin dawladda hoose. Sababahaas qaarkood waa kuwan soo socda:



Wacyigelin bulsheed oon jirin

“Ma jiro wax wacyigelin ama abaabul bulshada loo sameeyo si dadku ay uga qaybgalaan kulamada ay dawladda hoose qabanqaabiso.” – Muwaaddin (lab), Xamar Jajab.

“Weligeey ma arkin dawladda hoose oo dadka kulamo u qabanqaabinaysa.” – Barakace (dheddig), Xamarweyne



Amni Darro

“Amni xumada hadda Muqdisho ka jirta darteed ayaynaan ula tacaamuli karin dawladda.” – Muwaaddin (dheddig), Warta Nabadda



Kalsooni Darro

“Ma jirto kalsooni u dhaxaysa dawladda iyo bulshada.” – Muhaajir dhaqaale (lab), Shibis

“Aad ayay u adag tahay in bulshada la abaabulo, waayo ma jirto kalsooni u dhaxaysa dadka iyo dawladda.” – Muhaajir dhaqaale (dheddig), Hodan

“Bulshada badankeedu way ka cabsataa dawladda .” – Barakace (lab), Boondheere.



Ha'yadaha dawladda oo taag daran

“Xiriirka u dhaxeeya bulshada iyo dawladda aad ayuu u taag daran yahay, waana sababta ay dawladda hoose u awoodin in ay kulan u abaabusho degmada iyo bulshada.” – Muhaajir dhaqaale (lab), Shangaani.

“Dawladda hoose kulamo ma abaabusho waayo bulshadu waxay keenaan su'aalo aanay dawladda hoose ka jawaabi karin, waana taas sababat ay dawladda hoose bulshada ula falgalin.” – Muwaaddin (lab), Shangaani.



Dadka oo danahooda ku mashquulsan

“Bulsho abaan uma aragno in kulamada noocaas ah ay wax dan ah noogu jirto, waayo dawladdu waxba nooma qabato.” – Muhaajir dhaqaale, Hodan

“Danahayga qaaska ayaan ku hawlanahay, saa darteed wax kulan ah kama qaybgali karo” – Muwaaddin (dheddig), Xamar Jajab



Naafannimada oo aan wax caadi ah loo arkin

“Maaddaama aan ahay qof naafo ah, meel walba ma aado karo oo kulamo kama qaybgali karo.” – Barakace (lab), Dharkeenley





Sawirro: Qaar ka mid ah dadkii aan waraysanay

MATALAADDA DAWLADDA HOOSE

Dawladdu waxa ay kor u qaadi kartaa sharciyaddeeda, dhisina kartaa kalsoonida muwaadiniinta iyada oo abuuraysa maamullo dadku leeyahay, tayana leh oo kormeera bixinta adeegyada bulshada. Golyaasha deegaanka ayaa lagu tiriyaa in ay yihiin heerka aasaasiga ah ee dawladdnimada, matalaadda goleyaashaasina waxa ay xaqiijisaa in codka bulshada loogu ololeeyo dawladdaha hoose qaybaha kale nidaamka dawladda.

- 79% (849) jawaab-bixiyeyaasha ayaa soo tebiyay in ay jiraan gole deegaan oo laga soo doortay meelaha ay ku nool yihiin. 69 qof oo jawaab-bixiyeyaasha ahna waxa ay sheegeen in uusan jirin gole deegaan, halka 15% (161) jawaab-bixiyeyaashu ay soo gudbiyeen in si uun uu u jiro gole deegaan oo ay leedahay degmadooda.
- Guud ahaan, dadkii la waraystay waxa ay ku wareersanaayeen matalaadda goleyaasha deegaan maadaama aysan u caddayn cidda iyaga ku matasha goleyaashaasi. Kuwa tilmaamay in lagu matalo goleyaashana waxa ay sheegeen in qaar aad u yar ay baahiyahoodu u doodaan.



Shaxda 8-aad: Matalaadda dawladda hoose

CADDADKA SOO SOCDA...

Caddadka soo socda ee Daadihiye waxaa ku jiri doona natiijooyin ku saabsan kaalinta ay muwaadiniintu ku leeyihiin geeddi-socodka dawladdnimada, falcelinta ay shacabku ka bixiyaan waxa ay ka filayaan dawladda, iyo sida dawladdu ay u horumarin karto bixinta adeegga ee dawladda Soomaaliya.



WIXII XOG DHEERAAD AH:

Fadlan booqo:

www.daadihiye.com

www.daadihiye.so

Nagala soo xiriir:

daadihiye@raagsan.com

Nagala soco:



Soo wac

